

**Dugsiyada Dadweynaha ee
Portland
Adeegga Cuntada
Qaybta Xisaabinta
Ogeysiis 100 – Habka Lacag
ururinta
May 2017**

Hadafka Hay'adda Waxbarashada Dadweynaha ee Portland waa in ardayda maalin walba la siiyo cunto caafimaad leh. Ha yeeshee, haddii lacag badan ardayga lagu yeesho, waxay culays badan saari kartaa Waaxda Adeegga Cuntada. Iyadoo Wasaaradda Beeraha Qaybta Cuntada Carruurtu aysan waajib nagaga dhigayn inaan qado siinno haddii ardayda sanduuqooda (account) lacagtu ka dhamaato, haddana waxaan adeegyagan u samaynaa annagoo ardayda ku maamusayna maadaama ay dhici karto inay illoobaan.

Xeer-hoosaadka Wasaaradda Beeraha ee tirsigiisu yahay SP46-2016, waxa uu adeegyada cuntada farayaa in la sameeyo tixraac lagu ururiyo lacagaha cuntada ee aan la bixin.

Laanta Waxbarashada Dadweynaha ee Portland waxay dajisey habraaca hoos ku qoran iyadoo la aqoonsan yahay in ardaydu marmarka qaarkood soo illoobi karaan lacagaha. Habkani waa mid baraya ardayda masuuliyaddooda isla markaana dhaqaalaha dhowraya. Hadafka waaxda Adeegga Cuntadu waa in ardayda aan dayn lagu yeelan.

Annagoo ku xushmaynayna, waxan ardayda xusuusin u diraynaa marka kaydka sanduuqoodu gaadho \$9.00.

Ardayda waxan siin doonna cuntada anagoon u eegayn kaydka sanduuqooda ku haray, iyadoo lacagta lagu qorayo.

Haddii ardayga lacag lagu yeesho, waxa loo diri doonaa email iyo fariin otomatik ah. Fariintan waxa waalidka loo diri doonaa Isniinta, arbacada iyo Jimcaha, ardayda dugsiyada hoose-na waxa dheer warqad lagu ridayo shandadda ardayga todobaadkii hal mar.

Haddii wax jawaab ah laga waayo 5 qado ka dib ardayda dugsiga hoose ama 3 qado dugsiga sare, waxan bilaabi doonaa qaandhabasho.

Qaandhabashada waxa abaabulaya Agaasimaha Waaxda Cuntada, waxana ku xigaya khasnajiga dugsiyada, ka dibna Guddoomiyaha Waxbarashada

Lacag celinta

- Arday dugsiyada ka baxa, waxa qoysku soo diri karaa codsi qoraal ah oo caddaynaya lacagta aan la isticmaalin ee ugu jirta sanduuqa. Waana la aqbalayaa in email lagu soo diro. Codsiga waa in la soo diraa 60 bari gudahood ka dib marka ardaygu ka baxo dugsiga, waana in lasoo diraa intaan sannad-dugsiyeedku dhamaan.
- Ardayga qalinjabinya dhamadka sannad-dugsiyeedka lacag looma celin doono. Waalidka lacagta baaqiga u ah waxay ku wareejin karaan arday kale iyagoo qoraal ku muujinya inta aan sannad-dugsiyeedku dhammaan.

Baaqiga soo hara dhamaadka sannad-dugsiyeedka

- Waxa mar walba lacagta baaqiga ah laga fiirin karaa adigoo galaya Paypams.com, ama Infinite Campus, ama weydiinaya shaqaalaha waaxda cuntada ee dugsiga ilmahaaga.
- Wixii lacag ah ee lagugu leeyahay waa in la bixiyo gabagabada sannad-dugsiyeedka. Qoysaska waxa la wargelin doonaa ugu danbayn June 1deeda haddii baaqi lagu leeyahay. Qoysaska waxa laga doonayaa inay bixiyaan wixii lacag ah ee lagu leeyahay iyadoo dhamaystiran.
- Wasaaradda Beeraha (USDA) waxay u aqoonsantahay daynta aan waqtigeedii ku bixin inay tahay deyn fasaadday oo aan la heli karin.

Waaxda cuntadu ma wadan karto daynta xilli dhaaftay ee ka dib dhacda dhamaadka sannad-dugsiyeedka waxana loo xilsaari doonaa sanduuqa guud.

Lacagta kuu soo harta sannad-dugsiyeedka waxa aad u isticmaali kartaa sanduuqa ardaygaaga sannadka danbe.

Wixii baaqi ah ee la qaadan waayo waxa la wareegi doona Laanta Waaxbarashada Dadweynaha ee Portland.